# Xabsiga Dowladda Hooes ee Seattle

## Su'aalaha Badanaaba La Weydiiyo

**1. Waa maxay waxa aan xata ugu baahanahay xabsiga loogu tala galay dambiyada aan saas u weyneyn? Qaar aad u tira badan oo Mareykan ah aya xabsiga ku jira.**
Magaaladu waxay ay yarays dadka xabsi loogu taxaabay dambiyo aan sida uu sii weyneyn ilaa 38% 10kii sano ee ugu dambeeyey. Magaaladu waxa ay siiwadeysa in ay ka shaqeyso yaraynta tirada dadka ay tahay in ay xabsi in loo taxaabo falidda denbiyo aan saas u weyneyn. Hase-yeeshee, sharciga gobolku waxa uu u baahanyahay in qaar dambi geliyaasha, sida dadka leh taariikh baabuur wadidda iyaka oo doorsan, in xabsiga la dhigo. Sharcigu waxa kale oo u waajiibaya diiwaan gelidda iyo xabsi dhigidda mudo qof kasta oo loogu eedeyey rabsho guri gudihiisa ah. Amniga dad-weynuhu waxa uu dalbanaya in Magaaladu ay xidho dadka qaarkood si ay u joojiso halista ku dhici karta kuwa kale. Intaa waxa sii dheer, saddexdii dalool hal dalood dadka loo diiwaan geliyey in xabsiga la dhigo ayaa horey looga soo duwey ama laga soo daayey xabsiga – laakiin waa ay ku guul-daraysteen in ay maxkamadda ku soo laabtaan, taas ku dambeysay xidhitaankooda oo isla markaana si cusub loo diiwaan geliyo in xabsiga la dhigo.

**2. Maxa loola shirakoobi waayey magaalooyin kale ee waddanka? Waxa aan maqlay Renton, Kent iyo Federal Way in ay xabsi dhisayaan. Maxa heeshiis loola geli wayey iyaga?**
Si loo fuliyo baahidooda 20ka sano ee soo socda, magaalooyinka Degmada Koonfur waxa ay qiyaaseen in ay u baahanyihiin in ay dhisaan xabsi qiyaastii 800 oo sarirood (ilaa laba laab ah waxa ay Seattle u baahantahay). Waa ay adagtahay in la helo goob weyn oo ku filan in ay wada qaado dadka xabsiga ku xereysan Seattle iyo Degmada Koonfur. Waxa kale oo adag in la helo goob juqraafi ahaan u sahlan dhammaan magaalooyinka oo dhan. Waxa aan weli la kulmayna magaalooyinka laga bilaabo waqooyiga iyo galbeedka Degmada King sidii wadajir loo dhisi laha xabsi. Magaalooyinkaasi waxa aminsanyihiin in ay u baahanyihiin oo qudha ilaa 200 oo sariirood 20ka sano ee soo socda.

**3. Xabsi cusubi waxa uu ku kici doona lacag fara badan. Sidee bay Magaaladu u bixin doonta?**
Weli ma garaneyno waxa uu noqon doono kharashka xabsi cusub. Ka hor inta aanan qiyaasin kharashkiisa, Magaaladu waa in ay dooratаа goob oo isla markaana abuurto naqshad. Magaalada Seattle waxa ay leedahay awood ay ku iibiso waraaq lacag amaaheed ee wax lagu maalgeliyo dhisidda xabsi cusub oo deynta laga bixin doona dakhliyadeeda imminka jira.

**4. Miyeyna kharash badneyn maamulka xabsigu? Sidee bay Magaaladu u bixin doonta? Magaaladu miyey u baahnaan doonta in ay cashuurta kor u qaado?**
Waxa aan imminkaba bixina kharashka hoyga dadka ku xereysan xabsiga ee xabsiyada degmooyinka King iyo Yakima, sidaa darteed ma aanu filayno isbedel weyn ee ku dhaca kharshyada hawl fulinta. Hawl fulinta xabsiyada waxa laga bixin doona dakhligga cashuurta Magaalada ee imminka jira. Marka la eego shaqaalaha looga baahnaan doono xabsiga dawladda hoose, weli go’aan kama gaadhin haddii Magaaladu qoran doonto shaqaalaha si toos ah ama ay qandaraas la geli doonto Degmada si loo keeno shaqaalihii xabsiyada.

**5. Xabsiyadu waxa ay soo jiitaan kuwa shakhsinimadoodu xuntahay. Sidee baad adigu sabab fiican ugu yeeli karta in aad xabsi dhigtid badhtamaha xaafad? Dadku wey ka baqan doonaan in ay dibedda u baxaan.**

Magaaladu waxay qaadaysa mas'uuliyadda in ay xajiso aminga beelaha. Marka aanu eegayno gooba suuroobi kara, waxa aan baadhidda ku soo koobayna kuwa loo seereeyey isticmaalka warshadaha iyo ganacisga culus ama tafaariiqda. Marka dadka badankiisu ka fikaraan xabsiyada, waxa ay maskaxda ku sawirtaan dambiilayaal aad u xun. Kaasi ma ahaa sawir run ah, si kastaba ha ahaatee, ee dadka Magaalada ee galay dambiyo aan sidaa u weyneyn. Midka caadiga ah oo xidhan waxa weeye nin 37 sano jira oo sugaya in maxkamad loo saaro dambi aanan rabsho lahayn oo xabsiga ku jira marka la isku celceliyo 10 maalmood. Intooda badan ma laha dambiyo kale oo sugaya meel kastaba ha ahaatee.

Darsi ay sameeysay Waaxda Cadaaladda ee Mareykanka (U.S. Department of Justice) ayaa baadhay toddobo goobood ee xabsi oo ku yaala afar gobol oo waxa aanu ogaaney in wax weyn oo muhim ah u dhexayn heerka dambiga ee u dhexeeya xaafadaha xabsi ku yaalo iyo xaafadaha u dhigma ee aanan lahayn xabsiyo (een mararka qaarkoodna, heer dambiyadu waa ka hooseeya). Ayadoon la tixgelinayn meesha xabsiga dawladda hoose marka ugu dambeysa laga dhisi, Seattle waxa u go'id ah in ay dhisto meel si wanaagsan loo nashqadeeyey oo noqoneysa jiiraan fiicaan.

**6. Waa maxay sida xabsiga cusubi uu u ekaanayo?**
Ma garanayo weli. Ma bilaabi karno naqshadiisa ilaa intaa aan goob ka dooranayno.

**7. Waayo Magaaladani ugu baahantahay goob 7+ hektar ah? Maxaad u sameyn weydeen daar-dheer oo suuqa hoose ku taal?**
Qaadashada dhulka, kharashaka dhisidda iyo kharashka hawl-socodsiinta waxa ku kala duwan yihiin naqshadda ikhtiyaarka kuwa gaaban vs. kuwa dheer. Iyada oo ku dhisan baadhitaankeeda iyo falanqaynteeda, Seattle waxa ay aaminsantahay xabsi daar-gaaban in uu u amni wanaagsanyahay shaqaalaha iyo dadka xidhan oo isla markaana kharash yaryahay dhismaheeda iyo hawl-socodsiinteeduba. Seattle waxa ay qoratay la taliye ka caawiya sidii ay u qiimayn lahayd kuwan ay malaynayso. Magaaladu waxa ay filaysa in ay hesho macluumaadkan ilaa Luulyo 2008.

Dhisme gaaban waxa uu u baahanyahay ugu yaraan goob 7-hektar ah. Darsidii Ricci Greene Associates ay qiyaastay ee daar gaaban waxa ay noqon doonta 188,000 feet oo afar gees ah. Tani qiyaas ahaan waxa ay u dhiganta 4 hektar. Ka dib waxa u

baahantahay in aad u ogolaato meel baaburta la dhigo, baahiyo dib-u-dhac ah, meelo wax u dhexeeya, meel laga wareego (tusaale, u ogolaatid goob baaburto marto ama ka wareegto), iyo bullaacad-saaris. Qaybahan dheeradka ah waxa ay u baahanyihiin qiyaastii boqolkii 70 boos ah, taas oo noo geynaysa baahidii ahayd 7 hektar. Kuwani waxa weeye qiyaaso gogolxaar ah oo la sii hagaajinayo marka mashruucu horey u socodo.

**8. Magaaladu ma sii-wadaysa in ay isticmaasho xabsiga Yakima ?**
Qanadraaska Magaaladu imminka la leedahay Degmada Yakima waxa uu dhammaanaya 2010, een Magaaladuna waan-waan ayey geli karta si ay u siyaadsato ilaa 2012. Raali baan ku ahayn isticmaalkayaga xabsiga Yakima in uu noo xaaleeyo qaar ka mid ah maxaabistayada, laakinse waxa caddaan ah in uunan ahayn xal baahidayada xabsi ee mudo dheer. Aad bay u horeysa in la yiraahdo wixii dhici laha wixi ka shisheeya 2010.

**9. Kuwee ayaad la hadli doonta Jaaliyadda? Waxaannu maqalnay in aad dad waraysi ka qaaddeen. Sideeba taasi u soconeysa een isla markaana waa maxay waxa aad maqasheen?**
Waxa aanu waraysannay 50 madaxda jaaliyadda ah si aan u helno ra'yigooda oo isla markaana talo ay ka dhiibtaan dhisidda xabsi cusub. Shakhsiyaadaasi waxa ay ka wakiilyihiin kooxo taxan laga bilaabo guddiyada xaafadaha ilaa kooxo dana-gooni leh ee ka soo jeeda qaybo ballaadhan ee jaaliyadda. **Wada-hadaladani waxtar ayey lahaayeen oo waxa ay na siiyeen aragtiyo badan oo wanaagsan. Arrimo badan oo la soo qaaday waxa ay ku jiraan dukumeentadan su'aasha iyo jawaabta oo waxa ay sii-wadayaan in ay naga caawiyaan wadidda habkan.** Warbixin ku saabsan shaqo-waraysiyadan **ayaa lagu soo dhejiyey shabakadda internetka ee xabsiga dawladda hoose:** http://www.seattle.gov/municipaljail/

**10. Waayo ay  Seattle xabsiga uga dhisi weyday dibedda xadadka magaalada?**
Waxaan ka qaybqaadaneyna darsid suurto-galka in magaalooyinka ka bilaabma waqooyiga iyo galbeedka Degmada King oo la qiimeeyo waxa ay ku kala wanaagsanyihiin dhismaha hal xabsi oo dambiyada aan saas u weyneyn vs. laba xabsi. Dhammaan magaalooyinka ka qaybqaadanaya darsiga suuro-galka waxa la weydiiyey in ay caddayn goobaha suuroobi kara. Haddii magaalooyinku go'aansadan in ay shariiko wada galaan si ay u dhisaan hal xabsi ee dambiyada aan saas u weyneyn, waxa ay u baahanyihiin in ay maraan hab wada fadhiisi ah oo lagu go'aamiyo meeshii iyada laga dhigi lahaa.

**11. Waa maxay waxa u noqon doono raad ku reebka deegaanka dhismaha mashruuc weyn oo kan oo kale?**

Mid ka mid ah sababaha ay u qaadato waqti dheer dhismaha xabsi cusub, ama sida mid kale ee mashruucyada weyn ee dadweynaha, waxa weeye mashruucyada balaadhan waa inay maraan dhawr dib u-hubin iyo amni ilaalin ku saabsan deeganka, oo ay ku jirto habka rasmiga ah ee Sharciga Ilaalilnta Deegaanka Gobolka (State Environmental Protection Act (SEPA)) iyo ta Bayaanka Raad-reebka Deegaanka (Environmental Impact Statement (EIS)). Ilaa iyo inta u habku ka noqonayo ugu

dambayn oo isla markaana aanu xulanno goob iyo naqshadda daarta, waa waxa aanan suuroobi karin in la yiraahdo waxa uu noqon doono raad reebkiisu.

**12. Halkay saas ka ahaan lahayd, maxaanu u beddeli weynay xeerarka iyo sharciyada mukhaadaraadka?**

Magaaladu waa inay qorsheeysa sidii ay hooy ugu heli lahayd dambiilayaasha iyada oo ku salaysan sharciga maanta, aan ahayn waxa laga yaabo in uu ahaan laha. Sharciyo la xiriira isticmaalka mukhaadaraadka waxa inta badan qeexa sharciga gobolka, kaas oo xad u yeela ikhtiyaarka Magaalada. Weliba, xataa haddii aanu joojin karno dadka lagu eedeeyo dambiyada aan sidaa u sii weyneyn ee mukhaadaraadka, waxa keliya oo ay dhimaysa tirada dadka xabsiga wax ka yar boqolkiiba 3. Haysashada mukhaadaraad iyo macmiilidda mukhaadaraadka waxa weeye dambi-weyn waxana xaleeya Degmada King; Magaaladu waxa ay xaraysa dhawr aad u yar ee dacwooyinka dambiga aan sidaa u weyneyn ee mukhaadaraadka.

**13. Side baa xaafadahu talo ugu dhiiban karaan xulashada goob?**

Qayb ka mid ah waxa aanu imminka samaynaya waxa weeye in aanu ka helno talo dhiibasho kooxaha xaafadaha si aanu si wanaagsan u ogaanno waxa walwalkooda iyo baahihdooduba tahay. Dadweynuhu waxa ay haystaan fursado badan oo ay ku bixiyaan jawaab-celis, oo kala taxan fagaarayaal dadweyne ilaa diritaanka faallooyin ka imanaya shabakadda internetka ee xabsiga dawaladda hoose ee Magaalada. Ugu dambayntii, Golaha Magaalada waxa uu qaban doona dhegaysiyo ay kooxaha xaafadaha iyo kuwa kale ka dhiiban karaan aragtidooda. Waxa muhiim ah in aad aqoonsatid, si-kastaba, in ay Magaaladu xabsi meel-uun ka dhisto. Ma aanu haysanno doorasho su'aasha iyada ah. Carayntayadu waxa weeye in aanu helo meesha ugu wanaagsan iyo in aanu samayno waxa aan kari karno sidii loo yarayanlaha wixi raad-reeba ee ay lahaan karto. Ayadoon la tixgelinayn meesha xabsiga dawladda hoose marka ugu dambeysa laga dhisi, Seattle waxa u go'id ah in ay dhisto meel si wanaagsan loo nashqadeeyey oo noqoneysa jiiraan fiicaan.

**14. Inteebu weynidiisu le'eekaanaya xabsiga Magaaladu u baahantahay in ay dhisto?**

Maalin maalmaha ka mid ah, waxa qiyaasti jira ilaa 300 oo shakhsi ee Magaalada ka yimi oo lagu eedeyo ama dambiile ah ee dambiyo aan sida u sii weyneyn ee xabsiga Degamada King. Darsid madax banaan wax ay ogaatay si loo xisaabi kormada, laakiinse iyada oo la tixgelinayo syaabaha kale ee badan oo ka duwan isticmaalka xabsiga, waxa marka la isku-celceliyo uu noqdon doona 383 maxaabiis marka la gaadho sannadka 2026. Tirada sariiraha xabsiga ee loo baahan doono in ay hooyso maxaabiista waxa ay ka saraysa 15% si ay u ogolaato xaaladaha ay ugu sareeya (tusaale toddobaadka dhammaadkiisa iyo bilaha kulaylaha waxa ay leeyihiin lambro sare; maalmaha todobbaadkii iyo jiilaalku bilahoodu waa yaryihiin). Magaaladu waxa ay filaysa in ay dhisto xabsi dawladda hoose oo leh 445 sariirood. Marka la is barbar dhigo, xabsiga Degmada King ee ku yaal suuqa hoose ee Seattle wax qaadkiisu waa 1,697 maxaabiis.

**15. Kani miyay saameysa dhalinyarda haba yaraate?**
Maya. Tani waxa ay saameysa dadka wawyn oo qudha ee galay dambiyo aan sidaa u sii weyneyn. Degmada King waxa ay sii wada hooynta dhallinyarada ku xidhan Xarunta Adeegyada Da'da yar (Youth Service Center).

**16. Waa sidee kuwa baxsada? Sidee bay Magaaladu uga ilaalin doonta xaafadda kuwa soo baxsada?**
Xabsiga kuwa ka soo baxsada aad bay dhif u yihiin. Qofna wax sannad ka badan xabsiga kuma jiro maxbuuska caadiga ah ee galay dambiyo aan sidaa u sii weyneyn waxa uu xabsiga ku jira dhawr maalmood oo qudha. Sida dhabta, ma jiraan wax ka baxsaday mid kasta meelaha xabsiga ah ee Degmada King10kii sano ee la soo dhafay.

**17. Maxa dhacaya marka la sii-daayo maxaabiista dhammaan saacada kasta ee maalintii iyo habeenkii?**
Dhaqanka imminka waxa weeye in la sii-daayo dadka dhamystirtay waqtigii lagu xukumay 8da subaxnimo, in kastoo sharcigu u baahanyahay in maxaabistii lacag lagu damiinto in la sii-daayo waqtiga ay bixiyaan. Magaaladu waxay eegaysa siiyaabo loo amni ilaaliyo meelaha ku wareegsan xabsiga, ay kuna jirto adeegyada iyo gaadiidka loogu tala galay maxaabiista, iyo siyaabo kale ee loo xaqiijiyo amniga dadweynaha. Waayo Magaaladu waa ay lahaan doonta meesha, waxa ay awoodi karta in ay dejiso siyaasadaha sii-deynta.

**18. Maxa si khalad la'aan ah ka dhici doona goobta xabsiga? Miyey jiri doonaan qolalal maxkamadeed? Xafiisyo qareennada loogu tala galay? Maxkamad soo-taagid fiidiyow ah?**
Magaalada ayaa naqshadda xabsiga samaynaysa ka dib marka la doorto goobta. Goor hore ay tahay in la yiraahdo iyada oo aanan khalad la'aan waxa meesha oolaya, in kasto oo aan odhan karno waxa ay hooyn karta ilaa 445 maxbuus oo isla markaana siino qololka shir ee loogu tala galay qareennada iyo maxaabiista ay ka wakiilka yihiin. Waxa jiri doona fursado jaaliyaddu talo dhiibato waqtiga habka oo dhan socdo.

**19. Magaaladu miyey tixgelinaysa in saldhig boolis meel la dejiso xabisga ? Ama ku darto saldhig boolis? Haddi xabsi loo baahanyahay in uu ahaado meel dhaw, caawimaad ayey tahay haddii joogitaan boolis oo badan uu jiro.**
Fadhiga saldhig boolis waa hab ka duwan ka helitaanka goobta loogu tala galay xabsiga dawladda hoose. Sida caadiga ah joogitaanka boolisku wuu kordhaa meelaha xabsiga haddii lagu daro saldhig boolis iyo in kaleba.

**20. Sidee Magaaladu ula macaamili doonta siyaadada tirada badan ee socdaalka baaburta haddii xabsiga laga dhiso dibedda suuqa magaalada hoose? Waxa ay muuqata in ay deegaanka u xuntahay, saraakiisha ka kaxayso dariiqyada, iyo isla markaana amniga jaaliyadda khatar geliso meesha xabsigu ku yaalo.**
Magaaladu waxa ay sahminaysa arrimaha gaadiidka kolka ay qorayso Bayaanka Raad-reebka Deegaanka (Environmental Impact Statement) oo qayb ka mid ah habka rasmiga ee SEPA. Shirarka dadweynuhu waxa ay gaar ahaan xoog-saarayaan arrimaha SEPA, sida gaadiidka, waxana la qaban doona dhammaadka qulaylaha ama bilawga diyarta ee sannadkan. Xabsi keligii meel ku yeela ma laha baabuur badan oo ag marta sida ka xarunta cadaaladeed oo ay deganyihiin maxkamado, sida ka ku yaala

Kent. Xabsi keli-taagan sida caadiga ah waxa u leeyahay gaadiid qaada maxaabiista, qareennada iyo booqashooyinka qoyska. Arrimo khaas ah ee socodka baabuurta waxa la soo qaadi doona marka meesha la naqshadeenayo oo isla markaana la abuuro qorshe hawl-fulineed.

**21. Waxa aan maqlay Guddiga Degmada iyo saraakiisha maxaabiista ay leeyihiin in Degmadu ay doonayso in ay siyaadiso dhammaadka waqtiga oo isla markaana abuurto xal goboleed si ay magaalooyinku aynan u dhisin xabsi. Waayo aad weli horey ugu waddaan dhisidda xabsi dawlad hoose? Miyaad kala shaqaysaan arrintan Degmada?**
Magaaladu ma dooneyso in ay dhisto xabsi dawlad hoose. Magaaladu aad bay ugu faraxsantahay sii-wadka la shaqaynta Degmada King in hooy loo helo kuwa galay dambiyo aanan sidaa u sii weyneyn. Degmada King waxa ay is-gaarsiin u dirtay magaalooyinka in xabsi sariiro leh uunan diyaar u ahayn dambiilayaasha Magaalada 2013. Haddii Degmadu ay haysato ikhtiyaaro kale, oo ay ku jirto siyaadinta dhammaadka waqtiga, ama fidinta Xarunta Cadaalad ee Deegaanka (Regional Justice Center), ama dhisidda xabsi goboleed, Magaaladu waxa ay si faraxsan u la shaqayn doonta Degmada ee ku saabsan ikhtiyaaradaas. Hase yeeshee, luuqada qandraaska imminka waxa uu nugu khasbaya in ay horey ula socono dadaaladayada qorshaha imminka sababta oo ah Magaaladu waxa sharci ahaan looga baahanyahay in ay hooyso kuwan galay dambiyo aanan sida u sii weyneyn. Xata hadii la helo xal goboleed, qofi waa inuu weli dhisa xabsi ama xabsiyo meel ku taala Degmada King ( iyo haddii ay suuroobi karto gudaha Seattle).

**22. Sidee ayey Magaaladu ugu soo koobi karta afar goobood iyada oo aanan tixgelinayn sida ay ugu dhowyihiin dugsiyo, jardiinooyin, iyo guryo? Sida Magaaladu ugu tagtay 35 goobood ilaa 11 ilaa afar?**
Waxa aanu tixgelinayna dhawr <u>xalood</u> een hababkan lagu go'aaminayo goob. Waxa aan u baahnahay in aan caddayno goobo weynaan ku filan leh oo isla markaana u qaabaysan si meel dajin karta xabsi. Ka hor inta aanan la samayn doorashadii ugu dambaysay, waxa aanu tixgelinayna xaalado dheeraad ah, oo ku jiran u dhawaanshaha guryaha, jardiinooyinka, iyo dugsiyada, iyo sida oo kale raad-reebyaha deegaanka. Ma suuroobi karto in dhammaan ahaan la geeri gooyo xabsiga magaalo dad u tira badan sida Seattle. Sida <u>khariidadani</u> tusayso, waa ay adagtahay in la helo meel magaalada gudaheeda ku taal oo aanan hal mayl u jirin dugsi. Waan soo dhawaynayna talada xaafadaha ee ku saabsan dhammaan xaaladaha aanu tixgelinayo.

**23. Magaaladu ma isticmaali karta sharciga dawladdu dhulka kula wareegto?**
Tani waxa weeye ikhtiyaar u furan; hase yeeshee, Magaaladu waxa ay door bidaysa in aynan isticmaalin sharciga dhulka lagula wareego haddii ay dhammaan suuroobi karto.

**24. Sidee bay Magaaladu u tixgelinaysa goobaha hal mayl gudihii u jira dugsiyada?**
Ku dhawaad magaalada oo dhan hal mayl ayey dugsi u jirta. Waxa aanu tixgelineyna u dhawaanshaha dugsiyada iyo jardiinooyinka, iyo ka eegidda meel fog, iyo isla sida oo kale awood gaadhidda iyo waxa ku hor gudban ee juquraafi ah. Waxa noo go'an dhisidda xabsi dawladda hoose oo amni ah oo noqon doona jiiraan wanaagsan.

**25. Sidee buu xabsigu ugu habboonyahay qorshaha xaafadaha jira, arrimaha ficil laga qaadayo, ama xaafad magaalo loo cayimay?**

Xaafadna ma tixgelin xabsi cusub marka qorshaheedi la naqshadaynayey. Marka goobta ugu dambaysa la xulo, waxa aan la shaqayn doona jaaliyadda sida xabsi dawladda hoose laga yaabo in uu raad-reeb u yeesho qorshaheeda.

**26. Goorma ayaa talada la gaadhi?**

Meel bilawga ayaan joogna habkan dheer oo ay ku jiri doonto fursado loogu tala galay dadweynuhu in uu ka faalloodo oo isla markaana dib u–eegaanna deegaank. Guddiga Magaalada waxa la filaya in ay sameeyaan go'aankii ugu dambeyey bilowga 2009.

**27. Magaaladu ma tixgelisay raad-reebka tani u yeelanayso qiimaha hantida iyo aasaaska cashuurta?**

Daraasaduhu waxa ay ogaadeen in xabsiyo oo ku yaala magaalooyin kale ee waddanka oo dhan in ay raad-reebyo yar u lahayeen qiimaha hantidda dhammaan xaafadaha ugu dhow xabsi. Daraasad ay sameysay Waaxda Cadaaladda (Department of Justice) oo eegtay toddobo jaaliyadood ee afar gobol oo kala duwan oo laha xabsiyo oo la barbardhigay jaaliyado u dhigma oo aanan lahayn xabsiyo. Daraasadu waxa ay ogaatay in qiimaha gadidda ee guryaha la dego aynan si weyn uga duwanayn jaaliyadaha xabsiyo leh iyo jaaliyadaha aanan xabsi lahayn. Daraasadu waxa kale oo ay ogaatay in heerka dambiyadu ay isku dhigmeen ama ay hooseeyeen jaaliyadaha laha xabsi.

**28. Marka xabsiga la dhiso, maxaa ka hor-istaagaya in aad fidisid, ama aad u isticmaashid in ku xad dhaafan dambiilayaal khatar ah?**

Sida sharciga gobolku dhigayo, Degmada weli mas'uul bay ka tahay hooynta dambiilayaashu dambiga weyn gala ee la tuhmayo iyo kuwa sameeyey. Magaaladu ma laha wax mas'uuliyad ah in hooy u samayso kuwa dambiyo weyn galay een gudaha xabsigeeda dawladda hoose. Waxa aanu filaynayna in la dhiso xabsi qaada 445 sariirood on ku yaala goob ah toddobo ilaa 10 hektar oo ku filan in ay fuliso baahida Magaalada ee dambiyadda anaan sida u sii waa weyneyn ugu yaraan ilaa 2025.

**29. Miya barnaamij xabsi xukumid talantaali ah sal ku yeelan doona xabsiga, si dadka samaynaya warbixin maalmeed ay u imaan karaan xaafadaha iyakuna?**

Ma jiraan qorshe u gudbinaya warbixinta maalinti iyo barnaamijyo kale ee ka imaanaya meelahoodan imminka ku yaala suuqa hoose ee aadaya goobta xabsiga ee dawladda hoose.

**30. Miyey jiraan wax tusaale ah ee xabsiyo la leh raad-reeb wanaagsan – tusaale abuuridda shaqooyin badan? Waa maxay nocyada khafiifinta ee Magaaladu ay bixin karto?**

Xabsiyadu waxa ay yeelan karaan raad-reeb wanaagsan oo dhaqaale – jagooyinka saraakiisha xabsiyadu lacag ficiin ay bixiyaan oo waxayna leeyihiin manfacyo wanagsan. Shaqooyinka ay isku xiranyihiin dismaha wax kale oo ay u yeelan karaan dhaqaalaha raad-reeb wanaagsan. Aad bay u horeysa in la bilaabo in la cadeeyo khalad la'aan waxa ay tahay khafiifinta ay Magaaladu bixin karto - badanaaba kuwaasi waxa ay gaar u yihiin goobta iyo jaaliyadda la doortay. Tusaale ahaan, marka Degmada King ay dejisay Xarunta Cadalaad ee Deegaanka (Regional Justice Center (RJC) ee

Kent, Degmadu waxa ay oggolaatay in aynan bixin wax adeegyo cunta goobta ee loogu tala galay shaqaalaha iyo xeer-beegyaasha – si ay mukhaayada iyo tukaannada deegaanku uga faa'iidaystaan .

RJC waa tusaale sida xabsigu uu noqon karo jiiraan wanaagsan. Kent Commons (waa xarun lagu nasto) waxa ay ka soo horjeedaa RJC. Fagaaraha xeegada barafka aya imminka laga dhisaya ka soo horjeedka dhul horey hooy u ahaa goobo kubad. Kent Station (waa isku jir masrax shaneemo, tukaano wax laga gato, iwm.) waxa ay u jirta RJC laba cutub oo daaro is-haysta. Seattle waxa u go'aan ah in ay noqoto jiiraan wanaagan meel kasta oo uu ku yaallo xabsiga dawladda hoose.

**31. Haddi Magaaladu ay ka dhisto xabsi goob meel gaar ah, taa macnaheed miyaa xafiisyada damaanta iyo adeegyada kale oo soo raaca aya iyakuna soo degaya meela u dhow?**

Seattle waxay xog waraysatay magaalooyinka Issaquah iyo Renton, oo labadooduba ay leeyihiin xabsiyo 50 sariirood leh, waxa aan ogaanney midkoodba in aanu lahayn xafiis damaanadeed – maxabiistu waxa ay isticmaalaan xafiisyada damaanadda ee horey ugu yaalay suuqa hoose ee Seattle iyo Kent. Haddi maxbuus oo doonayo in u dhigo lacag damaanad ah, isaga ama iyadu waxa ay wacan xafiiska damaanadda, oo wakiil ayaa ugu imaan kara xabsiga si ay ula kulmaan maxbuuska. Qiyaastii boqolkiiba 10 ee maxaabiista dambiyadoodu aynan sida u sii weyneyn ee